

Waxyaabaha la iska dhaafayo ee loogu talagalay Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP



Sharraxaada iyo Liiska hubinta ee loogu talagalay Waxyaabaha la iska dhaafayo

Waxa ay tahay in la ogaado:

- Isbeddelo la xiriira federaalka awgood, laga bilaabo Janaayo 1, 2027, inta badan dadka waaweyn ee da'doodu tahay 19–64 ee ka tirsan Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) waa in ay shaqeeyaan, aadaan dugsi, tabarucaad sameeyaan, sameeyaan tababar shaqo, ama u qalmaan wax la iska dhaafayo marka ay codsadaan ama dib u cusbooneysiyaan OHP ay leeyihiin (oo sidoo kale loo yaqaan caymiska Medicaid). Ka dhig macluumaadkaaga mid cusub oo ka soo jawaab warqada boostada ee dib u cusbooneysiinta.
- Waxa la iska dhaafayo waa sabab aadan u baahnayn ama aadan u buuxin karin xeerarka. Waxaad u baahan kartaa in aad wax nooga sheegto xaaladaada ama na siiso caddeyn.
- Tilmaamahani waxay sharraxayaan waxa la iska dhaafayo oo kasta, sida loo ogaado in ay ku khuseeyaan, iyo waxa la sameynayo ee xiga.



Tilmaamaha la raacayo: Waxa la iska dhaafayo oo kasta, is weydii, “tani ma mid aniga i qeexaysaa?” Haddii ay jawaabtu haa tahay, raac tallaabada(ooyinka) si aad u muujiso in aad u qalanto.

Sida loo helo caawimaad ama loo soo sheego macluumaadkaaga:

- Gal koontadaada Koontadaada Dhanka internet-ka ee ONE ama App-ka Oregon ONE Mobile oo laga helo <https://benefits.oregon.gov>. CUSUB: Taageerada Chatbot-ka ayaa la helayaa si ay wax uga caawiso ka jawaabista su'aalaha ku saabsan u qalmida oo ah 24/7.
- Wac 800-699-9075. Wicitaanada gudbinta waa la soo dhaweynayaa.
- Si shakhsi ahaaneed oo ah xafiiskaaga degaanka ee Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS). Mid ka hel <https://ODHSoffices.oregon.gov>.
- Wixii la xiriira caawimaad laga helo kaaliyaha OHP. Mid ka hel <https://OregonHealthCare.gov/GetHelp>.



Iskaan garee code-ka QR si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato isbeddelada federaalka

<https://OHP.Oregon.gov/HR1>

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. OHP kala xiriir one.communications@odhsosha.oregon.gov.

1. Si toos ah loo Hubiyay



Uma baahnid in aad wax nooga sheegto waxyaabahani la iska dhaafayo ama in aad bixiso wax dokumentiyo ah. Waxaan kuwani hubinaa anaga oo adeegsanayna diiwaannada jira.

- **Xeerarka shaqada ee SNAP:** Waxaad heshaa Gargaarada cuntada ee Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP) oo ay tahay in aad buuxiso xeerarka shaqada ee SNAP. Buuxinta xeerarka shaqada ee SNAP waxaa loo xisaabinayaa OHP sidoo kale. Uma baahnid in aad si gooni ah u buuxiso xeerarka OHP. Si kastaba ha ahaatee, haddii lagaa dhaafo xeerarka shaqada ee SNAP, waxaad weli u baahan tahay in aad buuxiso xeerarka shaqada ama hawsha ee OHP ama u qalanto wax la iska dhaafayo oo kale.
- **Xeerarka shaqada ee TANF:** Waxaad heshaa gargaarada lacageed ee Taageerada Ku meel gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF) oo aad horeba u buuxinaysay xeerarka shaqada ee TANF.
- **Ka yar tahay da'da 19 jir:** Waxaad tahay 18 sano jir ama ka yar.
- **Dhallinyaro Hore loo soo Korsaday:** Waxaad ku jirtay daryeelka ilmo korsiga markii aad noqotay 18 jir iyo hadda oo aad u dhaxayso 19–26 jir.
- **Uu caymiska daboolayo barnaamij kale oo ah OHP:** Waxaad u qalantaa OHP ka tirsan barnaamij aan kaaga baahnayn xeerarka shaqada ama hawsha.
- **Ku nool degaan shaqo la'aantiisu sarreyso:** Waxaad ku nooshahay degaan leh heerka shaqo la'aanta oo sarreeya: Waanu kuu sheegi doonaa haddii tani ku khuseyso.
- **Ku nool goob musiibo ka jirto:** Waxaad ku nooshahay degaan ay dowladda federaalku ku dhawaaqday in ay tahay meel musiibo ka jirto.

2. Noo Sheeg



Kaliya noo sheeg haddii waxyaabahani la iska dhaafayo ku khuseeyaan adiga oo soo sheegaya macluumaadkaaga. Uma baahnid in aad soo dirto wax caddeyn ah.

Waxa la iska dhaafayo	Tani ma mid adiga ku qeexaysaa?	Sida loo muujiyo in aad u qalanto
Hindida Maraykanka/ Dhaladka Alaska	Waxaad tahay xubin ka diiwaan gashan qabiil ay dawladda federaalku aqoonsan tahay (ama waalidkaa ama awoowgaa/ayeeydaa ay yihiin) ama saami ku leh Shirkad Dhaladka Alaska leeyihiin. Tani waxay sidoo kale dabooshaa dadka daryeel ka hela Adeegyada Caafimaadka Hindida ama Qabiilka ama Xarunta Caafimaadka Hindida Maraykanka ah ee Magaalooyinka.	Noo sheeg in tani khuseyso.
Uur leh ama dhawaan uur lahaa	Waxaad leedahay uur, dhawaan ayaad uur yeelatay, ama waxaad lahayd caymiska OHP intii aad uurka lahayd mararka qaar 12-kii bilood ee ugu dambeeyay.	Noo sheeg in tani khuseyso, gaar ahaan haddii aad adigu dhawaan uur yeelatay. Sidaasi waxaanu ogaan doonaa in waxan la iska dhaafayo ay ku khuseeyaan.
Dhawaan la iska soo daayay jeel ama xabsi	Waxaa lagaa soo daayay jeel ama xabsi 4-tii bilood ee la soo dhaafay gudahooda haddii aad tahay qof wax codsanaya oo cusub ama 9-kii bilood ee la soo dhaafay haddii aad dib u cusbooneysiinayso.	Noo sheeg in tani khuseyso.

3. Noo Sheeg ama Na sii Caddeyn (1 ee 3)



Waxaa dhici karta in ay ku filan tahay in aad kaliya noo sheegto haddii waxa la iska dhaafayo ay ku khuseeyaan. Ama waxaa dhici karta in aanu kaa codsano in aad soo dirto caddeyn.

Waxa la iska dhaafayo	Tani ma mid adiga ku qeexaysaa?	Sida loo muujiyo in aad u qalanto
La haysto Medicare	Waxaad leedahay Medicare Part A ama Part B, ama waxaad aad u qalantaa Medicare.	Sida caadiga ah si toos ah ayaan u xaqiijin karnaa tani. Haddii aanu codsano caddeyn, waxaad na siin kartaa kaarka Medicare, warqada Medicare, ama dokumenti kasta oo muujinaya caymiskaaga Medicare.
Xaaladaha caafimaad oo halis ah ama naafanimo keenaya	Waxaad helaysaa daryeel loogu talagalay xaalad caafimaad oo halis ah ama naafanimo keenaysa oo kaa horjoogsanaysa in aad shaqeyso ugu yaraan waqtiga barkiis. Noocyo badan oo ka mid ah xaalado u baahan daryeel caafimaad ama adeegyo ayaa loo qalmi karaa, oo ay ku jiraan waxyaabaha sida: - Xaalado ku meel-gaar ah: Ka soo kabashada qalliin weyn (sida qalliinka wadnaha ‘cardiac bypass’); dhaawac halis ah (sida jajabka); caabuqa sanbabka ‘pneumonia’; ama joogitaan isbitaal ama xarun daryeel oo loogu talagalay xaalad adag. - Xaalado halis ah ama muddo dheer soo jiray: Kansar u baahan chemotherapy ama shucaac, sifaynta kelyaha, cudurka Crohn, cudurka raaga ee neefsashada adkeeya ee sambabka ku dhaca (COPD), xanuunka niyad-jabka oo weyn, ama xanuunka isticmaalka mukhaadaraadka. - Xaaladaha u baahan la socod joogto ah ama daaweyn: Sonkorowga oo leh dhibaatooyin ama xanuun sambabada ku dhaca ‘cystic fibrosis’. - Xaalado jira inta la nool yahay: Cudurka lagu dhasho ‘Down syndrome’ (trisomy 21), xanuunka dhaawaca maskaxda ‘cerebral palsy’, indho-la’aan, ama naafanimo kale oo dhanka jirka, garaadka, ama korriinka ah oo weyn. - Faa’iidooyinka Social Security-ga: La helayo Caymiska Naafanimada Social Security-ga (SSDI) ama Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI).	Noo sheeg in tani khuseyso. Uma baahnid qoraal ka socda daryeel bixiye caafimaad sanadka 2027. Booqo daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah ugu yaraan hal mar sanadkii oo ka qayb gal ballamaha soo raaca. Haddii aad si joogto ah u helayso daryeel, diiwaannadaada caafimaadku waxaa dhici karta in ay nagu filan yihiin si aanu u soo xaqiijino waxa la iska dhaafayo. Haddii aanu codsano caddeyn (laga bilaabo 2028), waxaa dhici karta in aan u baahano qoraal ka socda daryeel bixiye caafimaad.

3. Noo Sheeg ama Na sii Caddeyn (2 ee 3)

Waxa la iska dhaafayo	Tani ma mid adiga ku qeexaysaa?	Sida loo muujiyo in aad u qalanto
Qof soo halgamay oo leh qiimeynta naafanimada oo buuxda	Waxda Arrimaha Dadka Soo Halgama (VA) ayaa kuu qoondeysay qiimeynta naafanimada oo ah 100%.	Haddii aanu codsano caddeyn, waxaad na siin kartaa nuqulka warqadaada ee isa siinta VA. Haddii qiimeyntaadu aysan ahayn mid joogto ah, waxaad u baahan tahay in aad soo xaqiijiso heerka qiimeynta naafanimadaada 12-kii biloodba mar.
Daryeelida ilme da'diisu ka yar tahay 14 jir	Waxaad tahay waalidka, mas'uulka, ama daryeel bixiyaha sida joogtada ah u daryeela ilme da'diisu tahay 13 jir ama ka yar.	Noo sheeg in tani khuseyso iyo xiriirka aad la leedahay ilmaha. Haddii aanu codsano caddeyn (laga bilaabo 2028), na sii kaalandar, jadwal, ama dokumenti kale oo muujinaya saacadaha daryeel bixintaada.
Daryeelida qof qaba naafanimo ama xaalad caafimaad oo halis ah ama naafanimo keenaysa	Waxaad si joogto ah u daryeeshaa xubin ka tirsan qoys ama qof kale oo qaba naafanimo ama xaalad caafimaad oo halis ah ama naafanimo keenaysa. Tani waxaa ka mid ah dadka aadan qaraabada la ahayn ama aadan la noolayn ilaa iyo inta aad ka bixinayso ugu yaraan 80 saacadood oo ah daryeel bishii.	Noo sheeg in tani khuseyso iyo xiriirka aad la leedahay qofka. Haddii aanu codsano caddeyn (laga bilaabo 2028), na sii kaalandar, jadwal, ama dokumenti kale oo muujinaya saacadaha daryeel bixintaada.
Lagu jiro daaweynta daroogada ama khamriga	Waxaad hadda ka qayb qaadanaysaa ama ka soo qayb qaadatay adeegyo ama taageerooyin si la iskaga daaweeyo xanuunka isticmaalka daroogada ama khamriga 5-tii sano ee la soo dhaafay gudahooda.	Noo sheeg in tani khuseyso. Haddii aanu codsano caddeyn (laga bilaabo 2028), na sii biil ama dokumenti ka socda adeeg bixiyahaaga ama la taliyahaaga oo muujinaya taariikhaha daaweynta.
Helitaanka daryeelka bukaan-socodka ama daryeelka guryaha la degan yahay	Waxaad ugu yaraan hal habeen ku qaadatay bukaan ahaan isbitaal, xarun dadka lagu xanaaneeyo, xarunta caafimaadka hab-dhaqanka ama dhimirka, ama meel la mid ah.	Noo sheeg in tani khuseyso. Haddii aanu codsano caddeyn (laga bilaabo 2028), na sii biilka, warqadaha bixitaanka 'discharge', ama dokumenti ka socda adeeg bixiyahaaga.

3. Noo Sheeg ama Na sii Caddeyn (3 ee 3)

Waxa la iska dhaafayo	Tani ma mid adiga ku qeexaysaa?	Sida loo muujiyo in aad u qalanto
Safarka loogu talagalay daryeel caafimaad	Adiga (ama ilmahaaga ama qof cashuur ahaan kugu tiirsan) ayaa ka maqnaa gurigaaga muddo toddobaad ah ama maalmo badan oo ka mid ah bisha si uu u helo daryeel caafimaad, ama waxaad ka maqnaatay shaqo, dugsi, ama hawlo shaqo si aad u caawiso qofkaasi.	Noo sheeg in tani khuseyso. Sanadka 2028, na sii warqadaha bixitaanka 'discharge' ama dokumenti ka socda adeeg bixiyahaaga.

Tusaalooyinka Xaaladaha Suurtagalka ah

Uur lahaansho



Tusaale: Priya waxay uur leedahay 8 bilood ah waxayna qaadataa OHP. Waxay horeba u soo sheegtay uurkeeda, markaa gobolku wuxuu ka arkaa diiwaannadeeda. Waxaa laga dhaafay iyada xeerarka umana baahna in ay bixiso dokumenti waxa taageeraya.

Ka dib marka ilmaheedu dhasho, waxa la iska dhaafayo waxaa si toos ah loogu dabaqaa 12 bilood. Haddii ay Priya weli ku jirto muddada dhalashada ilmaha-ka dib ee 12-ka bilood ah marka la joogo dib u cusbooneysiinta, uma baahna in ay wax sameyso. Ka dib 12 bilood, waxaa dhici karta in ay u qalanto waxa la iska dhaafayo iyada oo ah daryeel bixiyaha ilme da'diisu ka yar tahay 14 jir. Waxay u baahan doontaa in ay bixiso caddeyn, sida dugsi ama jadwalka daryeelka.

SNAP



Tusaale: Jamal waxaa laga dhaafay xeerarka shaqada ee SNAP, markaa uma baahna in uu shaqeeyo si uu u sii haysto faa'iidooyinkiisa SNAP. Wuxuu u qaatay in tani ay sidoo kale uga cudur daareyso xeerarka shaqada ama hawsha ee OHP. In la iska dhaafdo xeerarka SNAP si toos ah ugama dhigna in Jamal laga dhaafayo OHP. Wuxuu weli u baahan yahay in uu shaqeeyo, tabarucaad sameeyo, aado dugsi, ama u qalmo wax iska dhaafida OHP si uu u sii haysto caymiskiisa caafimaad.

Tusaalooyinka Xaaladaha Suurtagalka ah (Ayaa wali lagu jiraa)

Hindida Maraykanka/Dhaladka Alaska



Tusaale: Elena waa xubin ka diiwaan gashan qabiil ay dawladda federaalku aqoonsan tahay waxayna daryeel ka heshaa xarunta caafimaadka ee Qabiilka. Waxay u sheegtay gobolka in ay tahay xubin ka tirsan qabiilka Hindida. Waxan la iska dhaafayo marnaba wakhtiigu ma dhaco ama uma baahna in dib loo cusbooneysiyo. Sidoo kale waa run haddii Elena ay tahay qof saami ku leh Shirkad Dhaladka Alaska leeyihiin ama hesho daryeel iyada oo adeegsanaysa Adeega Caafimaadka Hindida ama Xarunta Caafimaadka Hindida Maraykanka ah ee Magaalooyinka, xataa haddii aysan jirin ka diiwaan gashanaanta qabiilka oo rasmi ah.

Lagu jiro Daaweynta Daroogada ama Khamriga




Tusaale: Marcus wuxuu dhammeystay daaweyntii bukaan-socodka ee isticmaalka opioid-ka bishii Maarso 2026. Marka uu dib u cusbooneysiyo 2027, gobolku wuxuu daaweyntiisa ku haystaa faylka, sidaa darteed, uma baahna in uu bixiyo wax macluumaad ah oo dheeraad ah. Marka uu dib u cusbooneysiyo 2028, wuxuu u qalmi doonaa iska dhaafida xanuunka isticmaalka mukhaadaraadka ilaa uu muddo 5 sano ah ku jiray soo kabasho joogto ah. Waxaa dhici karta in uu u baahdo caddeyn ka socota adeeg bixiye.

Daryeelida Qof Naafo ah



Tusaale: Robert wuxuu daryeelaa wilkiisa weyn, oo qaba naafanimu halis ah, wayna wada degan yihiin. Sababta oo ah waxay yihiin qaraabo oo waxay wadaagaan guri, Robert uma baahna in uu la socdo lambarka gaarka ah ee saacadaha daryeel bixinta. Wuxuu u sheegi karaa gobolka daryeel bixintiisa umana baahna in uu bixiyo caddeyn. Deriskiisa Ana ayaa sidoo kale daryeesha saaxiib qaba naafanimu, laakiin qaraabo maaha waxayna ku nool yihiin guryo kala duwan. Ana waxay u baahan doontaa muujinta in ay bixiso ugu yaraan 80 saacadood oo ah daryeel sanadka 2028 si ay buuxiso waxa la iska dhaafayo. Haddii aysan sidaa sameyn, waxay isticmaali kartaa saacadaha ay bixiso daryeelka oo lagu daray shaqo kale, dugsiga, tabarucaada la sameeyo, ama hawlo shaqo si loo buuxiyo 80 saacadood bishii.

Lahaanshaha Xaalad Caafimaad oo Halis ah



Tusaale: Meg waxay qabtaa sonkorowgaa nooca type 1 waxayna leedahay dhibaatooyin ka dhashay oo ku adkeeya in ay shaqeyso, tabarucaad sameyso, ama aado dugsiga. Waxay ballamo joogto ah la leedahay dhakhtarkeeda si uu isku waafajiyo daawooyinkeeda. Gobolku wuxuu ka arkaa tani diiwaannadeeda. Uma baahna in ay noo sheegto ama na siiso caddeyn.